









# HAILGAN



Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed

*Isbeddellada Muuqaalka  
Siyasadda ee Adduunka  
Saddexaad*

*Xiriirka Qaanuunka  
Dastuuriga iyo Qawaaniinta  
kale ee guud*

**Suugaanta Kacaanka**

**Nuxurka Aydiyolojiyada  
Hantiwadaagga**

U Halgan  
Waxbarasho  
Si Waxbarashadu  
Halgankaaga  
U Kordhiso



waxaa soo saara

GOLAHA DHEXE EE

XISBIGA H. K. S. BISHIIBA HAL MAR

## GUDDIGA QORAALKA

Cabdiraxmaan Ceydiid Axmed / Guddoomiye

Abuukar Maxamed Xuseen (Iikar) Xoghaye

## XUBNAHA GUDDIGA QORAALKA

Rashiid Sheekh Cabdullaahi

Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe)

Maxamuud Cabdi Cali (Bayr)

## QIIMAH

Soomaaliya

Koobigiiiba 2/= Shilin

Sanadkiiba 40/= shilin oo kharajka Boostada ku jiro  
Dumida Carbeed iyo Afrikada Bari

40/= shilin sanadki oo kharajka boostadu  
ku jiro.

Koonfur, bartamaha iyo Galbeed Afrika

\$17.00 sanadkiiba Kharajka boostadu ku ji-  
ro.

Aasiya

\$20.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku  
jiro

Yurub

\$25.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku  
jiro

Ameerika (Waqooyi iyo koonfur)

\$30.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku  
jiro.

# TUSMADA

DT  
407  
• H342  
No 42

## I. DAYMADA.

Barnaamijka dowladda cusub.

Bogga

2

## II. ARRIMAHAD SIYAASADDA, DHAQAALAHAD IYO BULSHADA.

— Isbeddelada muuqaalka siyaasadda ee ad-duunka saddexaad.

4

Maxamuud C. Cali «Bayr»

— Qaanuunka Dastuuriga ah iyo xiriirka uu la leeyahay qawaaniinta guud ee dalka.

7

Maxamuud C. Tuur-yare

## III. NOLOSHA XISBIGA

— Abaalmarinta 10kii sano ee Kacaanka.

9

## IV. ARRIMAHAD DUNIDA

— El Salfadoor.

11

Cabdi Yuusuf Ducaale «Boobe»

## V. WARBIXINTA BISHA.

— Xuska maalinta xooggaa Dalka.

12

— Shirkii dib u habeynta xeerka ururka M. Afrika.

13

## VI. HIDDAHA IYO DHAQANKA.

— Suugaanta Kacaanka

15

Axmed Cartan Xaange

## VIII. ARAGTIDA CILMIGA AH.

— Nuxurka Aydiyoolojiyadda Hantiwadaagga.

19

Cali Cabdulle «Cali Aar»

Telefon Lr. 720 51,74

S. B. 1204

Qolka Lr. 112


Guriga Ummadda

Muqdisho, JDS

**H A L G A N**

oo ku soo baxa afafka Soomaaliga  
Carabiga iyo Ingiriiska

CODKA RASMIGA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.  
Bishiiba mar sannadka 4aad, tirsigii 42, bisha Abriil 1980 Qiima.  
ha waa 2/= Shs. So



# Barnaamijka Dowladda Cusub.

*Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu bishii Febraayo 1980ka ku dhawaaqay dawlad cusub. Waqtigaas oo ku beegnaa fadhigii ugu horreeyey ee Golaha Shacbiiga heer Qaran. Dawladda cusubi waxay markiiba ku dhaqaaqday iyada oo tixgelinaysa hay-adaha kala geddisan sidii ay wax uga qaban lahayd arrimaha la xiriira Siyaasadda, gudaha iyo dibeddaba, dhaqaalaha iyo noloosha ijtimaaciga ah.*

*Taabba gelinta barnaamijka dawladda cusub ee qorshaha dhaqaale ee shanta sano ah iyo himilada siyaasadeed waxay muujinaysaa horumarinta bulshadeenna hantiwadaagga ah. Barnaamijka cusub oo ay ku dheehantahay waayo-aragnimadii laga helay tobankii sannadood ee isbeddelka kacaanku ka jiray dalka wuxuu tiro iyo tayo ahaanba muujinaya fulinta hadafka ummaddu ay leedahay xagga qarannimada, madaxbannaanida iyo horumar ijtimaci ah oo deg-deg ah.*

*Dhinaca siyaasadda ee Barnaamiju waxay taabnaysaa aragtida horusocodka ah ee Soomaaliya gudaha iyo dibeddaba. Waxaa la guddoonsaday joogtayn dhisme hantiwadaag iyo in la burburiyo wixii is-hortaaga mawqifka dimoqraadiga ah.*

*Horumarinta iyo sinnaanta dadka dhexdoodu waxay ahaan doontaa mid hoggaamisa siyaasadda gudaha. ka horjeedidda Imberyaliyadda, gumeysiga iyo gumeysiga cusub, sahyuuniyadda iyo midabtakoorku waxay noqonayaan gogol-dhigga siyaasadda dibedda. Waxay mar walba aragtideenna siyaasadeed ee caalamiga ahi noqonaysaa taageeridda gobannimadoonka iyo ka gilgilashada dhiigmiiradka lagu hayo adduunka saddexaad. Nabadda, is-ixtiraam, xiriir wanaagsan iyo inaan dawladina fara gelinin arrimaha gudaha ee dal kale waxay noqonaysaa mid aan u dagaallanno si adduunka oo dhammi u noqdo bulsho caafimaad qabta, taasoo gaar ahaan u faa'iidey.*

8/1/65

*naysa dalalka adduunka saddexaad ee Soomaaliya ka mid tahay. Marka keliya oo la samayn karo horumar dhaqandhaqaale waa marka la heloo nabad waarta.*

*Barnaamijku wuxuu xoog saarayaa sidii dhaqaalaha loo kobcin lahaa oo ku xiran isbeddelka wax soo saarka ijtimaaciga ah. Wuxuu markaa barnaamijku muhiimad siinayaa xiriirka qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha qaranka. Sida aan ka war qabnoo waxaa halbowle u ah dhaqaalaheenna beeraley xoolo dhaqato. Wuxuu markaa barnaamijku isku taxalujinayaa sidii labadaa qaybood xoog loo saari lahaa taasoo timid ka dib markii la darsay qiimaha dhaqaale ee ay ku fadhiyaan.*

*Dawlad waxaa lagu qiimeeyaa xumaanteeda iyo samaanteeda hadba sida ay u qiimeyso nolosha ijtimaaciga ah. Dawladda cusubi waxay waxbarashada, caafimaadka, shaqada iyo arrimo kale oo la xiriira nolosha ka dhigtay kuwa ugu horreyya ee la dhammeystiro mashaakilkooda. nolosha ijtimaaciga ee dal lama odhan karo way fiican tahay haddii aanay salka ku hayn dhaqaale fayow iyo siyasadba. Nolosha ijtimaaciga ahi kama duwana dhaqaalaha iyo siyaasadda muhiimada la siyo. Dawladda cusubi waxay ka amba qaaday xallinta nolosha ijtimaaciga ah, aragtida maadiga ah ee taariikhda oo aaminsan in qofku uu u baahan yahay cunto, gabood iyo dhar inta aanu isku taxalujin in uu raadiyo afkaar ruuxi ah. Haddaba tobankii sannadood oo aan soo dhaafnay oo kacaanku ka talinayey dalka, waxaa la qoray farta Soomaaliga, waxaa aad u korodhay fursaddii dadweynuhu u heli lahaa waxbarashada, waxaa yaraatay shaqo la'aantii dalka ka taagnayd.*

*Ciyaaraha oo baaba'sanaana waa la soo nooleeyey. Dhinaca nolosha ijtimaaciga ah waxay dawladda cusubi ka shidaal qaadataay khibradii waqtiyadii hore waxaanay higsanaysaa mustaqbal midho dhaliya.*

## Arrimaha Siyaasadda Dhaqaalaha iyo Bulshada



# Isbeddelada Muuqaalka Siyaasadda ee Aduunka Saddexaad.

— BAYR —

Horumarka beryahan dambe ay siyaasaddu samaysay waxay yihin Isbeddello ballaran oo dhinac kastaba ah; Ere-yada siyaasadeed ee shalay la isticmaali jirey iyo itijaahyadii siyaasadeed waqtigan haatan ah waxaa galay shaki weyn. Isbehaysiyadii hore u jirey way burbureen waxaana aburmay kuwo cusub. aydiyolojiyadii iyo doodihii ay hore u soo saareen kooxdii yarayd ee ahaa aqoon - yahannada Reer Galbeedka ah ee ay ka mid ahaayeen ninkii la oran jirey D.Bel iyo xaashiyaddiisii ayaa maanta halqabsi u noqotay aqoon - yahanno iyo siyaasiyiin badan oo ah waddamma-dada Adduunka saddexaad. Soo noolaanshaha (Machiavellism) makyaafalisamku soo baxday goobaha siyaasadda ayaa muujinaysa inay tahay dhabbo cad oo ay dadka aqoon - yahanna-da hantiwadaaggu wax ku qaadan karaan marka ay tamartooda kaga soo horjeedaan ra'yiga hantigoosiga, xoojinta maskaxda horusocodka ah ee aqoon - yahannada adduunka saddexaad iyo dadyowga ta-balaysan.

Doodda oranaysa, ma jiro saaxiibbo waara, hase yeeshee waxaa jira dana waara, waxa markii ugu horreeyey soo saaray ninkii la oran jirey Machiavell, waxaana sii shaac bixiyyey ninkii la oran jirey Winston Jeerjil (Winston Churchill). Weedhu waxay u egtahay inay mid habboon tahay, hase - yeeshee haddii laga eego xagga ti-way ka madhan tahay oo waa

been, waana mid khatar ah. Wuxaana been ka dhigay markii weedhu ay iska horkeentay labada ifafaale ee isku xiran iyo isla markaa halka ay ka ambaqaadayo. Wuxa kale oo ay khatar ku tahay wuxa ka dhex muuqda dhammaan noocyada danaystenimada ah.

Aan ka bilownee, weedhaasi waxay dafirsan tahay, in waqtigan haatan ah iska horjeedka ugu weyni uu yahay kan marxaladda ka gudubka hanti-goosiga ee loo gudbayo hanti-wadaagga, iyo dhaqdhaqaaq xornimo doonka ah ee aloosan. Haddii iska horjeedkaas labada hab aynu eegno waxaynu gaaraynaa in aragtiyooyinka Hantiwadaagga ah iyo hanti-wadaagga ah iyo hantigoosiga halganka ka dhaxeeyaa uu aad u xoog weyn yahay. Qofkii isku daya in uu dafiro iska - soo horjeedka labada dhaqandhaqaa (Hantiwadaagga iyo hantigoosiga) waxa aan shaki lahayn inuu dadka maxaysata-daa ah jidka ka habaabinayo. Qodobka ugu weyn ee dooddeennu wuxuu yahay, saaxiibtinimada iyo danta, inaan la kala sooci karin. Saaxiibtinimadu waxay tilmaan'aan danaha badan ee dadka ka dhaxeeyn kara, danaha la wadaagaana wanay dhidbaan xoogasiga saaxiibtinimada iyo danaha badan ee ka dhaxeeyaa ummadaha iyo dawladaha waxa keliya oo ay jiri karaan marka aragtay aydiyolojiyadeed oo isku mid ah la isugu yimaaddo. Ma jirto saaxiibtinimo bilan oo ka baxsan guud ahaan fekerka, iyo ha-

dafyada oo dihammaantood isugu biyo shubanaya aragtida aydiyolojiyadeed ee u gaar ah bulsho amase bulshooyin jira waqtii taariikhi ah.

Hordhacaasi wuxuu inoo muujinaya fahanka tiyooriyadda iyo baraatikada ee waqtigan aan ku jirro. Haddii aynu doonayno in aynu ogaanno baraatikada ama wax qabdkenna mustaqbalka soo socda ee bulshadeenna waxa lagama maarmaan ah in aynu si is - dabajoog ah u baadhno ifafaalayaashii hore iyo kuwa cusubba si aynu u dhex galno nuxurka runta ah ee Siyaasadda ka jirta adduunka saddexaad oo soddonkii sannadood ee aynu soo dhaafnay soo martay isbeddello xoog leh. Dhammaadkii kontonaadkii iyo bilowgii lixdanaadkii waxa xogaystay oo kor u kacay halgankii xornimadoonka oo mideeyey xoogagga bulshooyinka iyo dabaqadaha intooda badan, waqtigaas cadowga dadyowgu wuxuu ahaa gumeysigii yurutta galbeed. Dunida hantiwadaagguna waxay ahayd xooga ballaaran ee halgankii xornima - doonka. Burjuwaasiyadda oo horseed u ahayd ummaha u dagaallamayay xornimadu waxay macaawino ballaaran ka heli jireen dawladaha hantiwadaagga ah, taasina ay ugu wacnayd, mahadi ha gaartee, mabda'a xalaasha ah ee Caalaminimada broletaariyaadka iyo isgarabsigooda oo had iyo goor gacan wax ku ool ah u fidinayey xornimada dad-yowga adduunka saddexaad.

Madax aad u tiro badan oo ay ka mid ahaayeen Jamaal Cabdinaasir, iyo kuwaami Nakruuma, ayaa waqtiyaal aad u fara badan isku taxalujiyey inay tilmaamaan mucaawinada wax ku oolka ah ee dawladaha hantiwadaaggu ay ka gaystaan xornimada siyaasadda iyo dhaqaalaha dalalka adduunka sadexaad. Madaxdasi aragtida dheer lahayd iyagoo la kaashanaya siyaasadaha waddamma-dooda iyo siyaasadda dhexdexxaadka ahba, waxay raaceen jidka ka soo horjeeda Imberiyaaliyadda iyo hantigoosiga. Imberiyaaliyaddu iyadoo ka cadhaysan siyaasadda madaxa bannaan ee Jamaal iyo Nakruuma, waxay sameeyeen shir-qollo fara badan oo ay ula jeedeen inay xukunka kaga ri-daan, waxayna ku guulaysteen shir-qoolladaas kuwo ka mid ah.

Beryihii hore ee Imberiyaaliyad nacaybkeedu xoogga la-haa, waxaad mooddaa haatan in uu mad - madow galay. Waxaan iyana ka soo gudubnay ruuxii kacaanimada ahaa ee ummadeed ee sida cad uga soo horjeeday Imberiyaaliyadda iyo himilooyinkiisii u jeeday inay kharribaan dhammaan dhinacyada badan ee nolosha bulshada. Is - garabsigii mitidka ahaa ee lagaga soo horjee-day xoogagga kala duwanina ay ku canbaarayn jireen Monoboliyadaha ay isku bahaysteen ummadaha dhowrka ah ee hadafkoodu yahay inay helaan macaashka ugu sarreeya, ayaa haatan sii dacifaya. Laakiin, arrintaas waa inaan loo tarju-manin in himilooyinkii Kacaameed ay itaal darreeyeen. Hadafka ah in isbeddel kacaameed lagu sameeyo adduunka waa mid taagan lana sugayo in la xaqijiyo. Wixaana aan shaki lahayn in ay jiraan xoo-gag mitid ah oo horseed u ah himoladaas in ay gaarsiiyan bulshooyinka adduunka sadde-

xaad. Waxaa tilmaan mudan, in ay jiraan horumar tayo iyo is kala soocidda ah oo ay gaa-reen xoogagga bulshooyinka u halgamaya in dib u habeeyaan bulshadii hore oo ay abuuraan mid casri ah.

Waddammo badan oo ka tirsan adduunka saddexaad waxa ku xoog weyn nidaamka biro-qraadiyadda kombradoorka ah. Waxa la wada ogyahay inay burjuwaasiyadda biroqraadiga kombradoorka ah dabeecad ahaan meesha ay kaga jirto wax soo saarka bulshada, ay ka mid yihiin kabitaalka la soo dhoofiyo ee ay leeyihiin ummaha dawrka ah ee ku bahobay manaboliyadda iyo wakiillada kale ee kabitaalka caalamiga ah ee sida tooska ah ama aan tooska ahayn u xukuma dhaqaalaha ummadda. Burjuwaasiyadda biroqraadiga ah ee kombradoorka ahi waxay he-shaa macaash laba dhexaad ah oo ay ka hesho iibinta badeecadda laga soo - saaro waddammada dibedda iyo iyadoo adeeg ugu shaqaysa goobaha wax - soo - saarka ee ku yaalla dalkooda. Haddaba, dabaqad-daasi waa mid ka madhan dareenka waddaninimo maadama ay dakhligooda ka keenaan ii-binta danaha dalkooda ay ka iibiyaa shisheeyaha dhiigmiir-taha ah. Kama madhna oo ke-liya dareenka waddaninimo, laakiin waxa sidoo kale ay ka madhan yihiin kaalinta madax bannaanida ah ee lagu horumarinayo qaranka. Iyadoo ah dabaqad ku nool dhiig-miirad iyo boobidda khayraad-ka qaranka. Burjuwaasiyadda biroqraadiga ah ee kombradoorka ahi waxay is xejiyaan dhiigmiiratada qalaad, iyaga oo iska indha tiraya dhibaata-da culayska badan ee dulsaaran dadka badan ee dalka u dhashay, dhibaatadaas oo ay keentay dhiigmiiradka gudaha iyo dibeddaba ah iyo cadaadis-ka labadaas dabaqadood ee ma-

taanaha ah ee burjuwaasiyadda ahi ay ku raadinayaan ma-caashka uu suurto geliyey si-yaasadda ay dabaqaddoodu maamulayso, iyadoo ay kala qayb galayaan shaqaalaha adeegga ee sida istraatejiyada ah meesha loo dhigtay ee hela gacan saarka yar, iyo iyagoo xataa la siyo liisannada lagu ilaashado sayladda gudaha si ay qaali wax ugu gadaan, oo markaa ay ku kallifti inay og-golaadaan arrimaha markaas jira. Laakiin tallaaboooyinkaas khaa'innimada ah waxay leeyi-hiin hab kordhinaya isla mar-kaana xoojinaya dhaqaalaha bulshadooda. Sida badanna suuqa madoobi uu xoogaystaa; qiimaha badeecadda; dhulka iyo dhammaan waxyaabaha kale way ka sare maraan dakh-liga yar ee dadka badan ee xoogsatada ah, kuwaas oo lagu cadaadiyo inay oggolaadaan heer nololeed ee aad u hoosee-ya. Arrimuhuna waxay dhima-sho kama dambays ah yimaa-daan marka ay muuqato in waddanku fakhriyeyo, oo ay sayladda ka dhammaadeen badeecadihii daruuriga ahaa. Tu-saalooyin cadna waxaa loo qaa-dan karaa wixii ka dhacay Un-gaadha iyo Gaana.

Qodobka muhiimka ah ee ka muuqda lafa - gurkaasi aan soo sheegnay wuxuu yahay, arrimahaas jira oo dhammi, wax-yaabaha ay ku reebayaan Si-yaasadda dibedda ee bulshooyinka ay xukumaan burjuwaasiyadda kombradoorka ahi. In-nagoo malayn karna, ayaa had-dana waxaa si dhab ah loo xa-qijiyey in diyaalektikada Si-yaasadeed ee waddanka gudi-hiisu kuu muujinayso siyaasad-da dibeddu qaabka ay tahay. Wixaan ku soo ururin karnaa in mowqifka caalamiga ah ee bulshooyinkaas uu noqon ka-ro mid dib - u - socod. Hadday-nu ka eegno xagga Afrikaanka oo ay ka jiraan dhowr dawla-dood oo kombradoorka biro-

qraadiga ah, siyaasaddooda dibeddu ay amar - ku - taaglee. yaan Imberiyaaliyadda caalamiga ah iyo hantigoosiga. Ilaa waqtigan haatan ah dabaqada Kombradoorka biroqraadiiga ahi ma jecla inay dalka dhaqaalihisa ku dhisaan horumar madax bannaan. Iyagoo, ka duwan burjuwaasiyadda qaranka ee tixgelinaya halganka ay kaga soo horjeedaan in kabitaalka la soo dhoofiyaa qabsato sayladda gudaha, dabaqada haasi marnaba iskuma dayaan in ay habeeyaan siyaasadda dhaqaale ee gudaha iyo dibedda. Sida runta ah, waxay xoogooda oo dhan saaraan siday isugu dari lahaayeen dhaqaala ha dalalkooda iyo kan hantigoosiga caalamiga ah. Laakiin, isu - geynta sidaas ahi ma keento kaalin horumarnimo, hase yeeshee waxay cayaartaa kaalinta ah inay dacifiso dhaqaalaha qarankooda oo noqda mid u adeega una hoggaansama amarrada hantigoosiga Adduunka. Waxaan u jeedaa, isugaynta labadaas dhaqaale ma aha mid u dhacaya wax is - dhaafsi labada dhinac ka yi - maadda, laakiin waa mid dhinac keliya ah oo salka ku haya inuu dhaawaco wuxtarka mustaqbalka ee dhaqaalahaas jillicsan. Dhibaatooyinka ka alosan dhaqaalaha Imberiyaaliyadda adduunka ee ay ka mid yihiin qalalaasaha, qiimaha cirka isku shareeray dhibaatoo - yinka la xiriira shidaalka, iyo qimo bararka (infation) gaa - ray heerka sare iyo lacagta heehaabaysa ayaa loo soo gudbiyaa adduunka saddexaad dhaqaalahooda kaasoo diciifnimadii hore u haystay daraaddeed aan iska xajin karin khatartaas. Taas weeye sababta dadyowga adduunka sadde-

xaad ay si is - daba joog ah u sii fakhriyayaan, inkastoo, sanadba, sannadka ka dambeeya wax - soo - saarka beeruhu uu muujiyo korodhka dhoofiska badeecadaha daruuriga ah.

Haddaba iyadoo dabaqadaha burjuwaasiga kombradoorka biroqraadiiga ahi ay xukumaan dalal badan oo adduunka saddexaad ah waxay iska indho tiraan waxyaabaha runta ah ee ka taagan dhaqaalaha dalalkooda, taasina ay suurto gelin - wayday in dabaqaddaasi ay aragto xididka qudhminaya dhaqaalahooda. Inta hantigoosiga adduunku xukumayo dhaqaalahooda waxaa mar walba sii xoogaysanaysa inay isu dhii - baan kabitaalka la soo dhoofiyo.

Dabaqadaha casriga ah ee noqonaya taajiriinta mahad ha gaarto luf - lufka ay ka helayaan macaashka weyn ee Imberiyaaliyadda adduunka ee lagu helay muruqa dadyowga maxaysatada ah, waxa ka maqan kartidii ay isku hortaagi lahaayeen gurguuradka is - daba joogga ah ee kabitaalka la soo dhoofiyi. Waxay raadiyaan cudurdaarro fara badan si ay is - bahaysi siyaasadeed iyo isu - gayn dhaqaale ula sameeyaan Imberiyaaliyadda kana soo horjeestaan inay dadyowgoodu iska xireeyaan, cabiidsiga kabitaalka monoboliyadda Xoogga dheeraadka ah iyo soo noolaynta siyaasadeed ee ra'yiyadii Mikyafalisamka ee ku jirta weedha ah ma jirto saaxiibtinno waarta, laakiin waxa jira dano waara, waxa weeye arrin cusub oo dabaqadda Kombradoorka ahi ay is kaga iibinayso Imberiyaaliyadda u

talisa. Marka cudur - daarrada la xiriira in laga mid noqdo xuluufada Imberiyaaliyadda uu meel mar noqon waayo, haddana, burjuwaasiyadda adduunka saddexaad waxay garaacaan durbaanno kale oo dadka ay been ugu sheegayaan.

Hadal iyo dhammaan iyadoo aan soo dhaafnay waqtigii halganka xornimada ee burjuwaasiyadda waddammada adduunka saddexaad ay cayaari jirtey kaalinta horusocodka ah, waxa haatan taagan in xoogagga dabaqaduhu ay qaataan khcad oo la xiriira is - bahaysiga siyaasadeed. Burjuwaasiyadda adduunka saddexaad gaar ahaanna kombaradoorka biroqraadiga ahi ayaa waxaa muuqata in ay yeelanayaan midabkoodii, dhinacana ay saarrayaan Imberiyaaliyada u talisa. Iyadoo la isku dayayo in Imberiyaaliyadda laga nabad - geliyo adduunka saddexaad, ayaa haddana waxaa heedh - heedh la geliyey, su'aasha ah, Imberiyaaliyaddu waa ayo? Laakiin Imberiyaaliyadda waa la yaqaannaa, waana caan. Imberiyaaliyad cusub oo haatan dhalatay ama soo baxday ma jirto. Imberiyaaliyaddii ay taa - riikhda dhabta ahi sheegtay waa jirtaa, waana rafanaysaa. Imberiyaaliyaddaas cadowga u ah dadyowga adduunka ayeynu u jeednaa in aynu ku dhufanno dhirbaaxooyin kama dambays ah oo tirtira. Beenta laga sheegayo saaxiibtinimada istraateejiga ah ee xornimada dadyowga adduunka saddexaad waa mid aan raad lahayn. Waxa keliya ee ay abuurtaa waa dhalinteed iska baabi'doona waqtii aan dheyayn.

# Qaanuunka Dastuuriga ah iyo Xiriirka uu la leeyahay

## Qawaaniinta Guud ee Dalka .

— Maxamed C. Tuur-yare

Xiriirka dastuureed wuxuu u qaybsamaa, kan dastuurku la leeyahay qawaaniinta guud ee gudaha iyo midka uu la leeyahay arrimaha dibedda oo ku saabsan siyaasadda iyo qaanuunka duwaliiga.

Laamaha ugu muhimsan qaanuunka guud ee gudaha, haddii laga reebo qaanuunka dastuuriga, waxay yihiin qaanuunka maamulka, qaanuunka maaliyadda iyo kan janaayiga ama ciqaabta. Qawaaniintaanu, dhammaan, waxay ku kulanta mawduuc kaliya ee ah, haddii diirkha laga sii qaado ama la sii caddeeyo, qaranka, in kastoo midkiiba ka arkaayo qaranka dhinac aan kan kale ka eegeyn, markuu gudanaayo howshiisa u gaarka ah.

Qaanuunka dastuurgaanu, mitaal ahaan, intiisa badani, wuxuu nidaaminaya arrimaha siyaasadeed ee qaranka, marka kan idaarigaahu nidaamnaayo dhinaca arrimahaas ee maamulka, kan maaliyaduna dhinaca kale ee maaliyada, midka Janaa'igashuna dhinaca ciqaabta.

Haddaba, haddaan dib u sii falanqayno xiriirkan, waxaan ka Gun gaareynaa, guud ahaan, dabeeecadiisa, gaar ahaanna, heerarka uu kala joogo, marka loo fiiryo qaanuunka dastuuriga ah.

Falanqayntaan oo kale waxay noo ifinaysa meelaha qaarkood ee xirkaha qaanuumeed (qaanuunka dastuuriga iyo laamaha qaanuunka guud) isaga dhafmaan, baahi dhaqanka iyo mid cilmiba intaba loo qabo, sida ay nala tahay, in la kala saaro ama la kala furo xirkahaas.

Xuduudka ama soohdinta uu

dhexeysa qaanuunka dastuuriga iyo laamaha qaanuunka guud qaarkood aad bay u muuqataa Mugdi sii weynna kama saarnna xataa kuwaan aqoon gaar ahaaneed u lahayn qaanuunka guud.

Xuduudda xarriirkaas oo kale waxaa ka mid ah tan u dhexeysa qaanuunka dastuuriga iyo midka Jamaa'iga ama ciqaabta. Marka qaanuunka dastuurigaahu nidaaminayo, sidan kor ku soo sheegnay, hawlaha siyaasadeed ama dhaqaale, kan ciqaabta wuxuu nidaaminaya xariirka qaranka iyo qofka u dhexeeya oo ka dhashay dembi kan dembi ka galay bulshada.

Mawduuca qaanuunka ciqaabta ahu, wuxuu uga duwan yahay kan qaanuunka dastuuriga waxyaalaha uu kulminayo oo ay ka mid yihiin caddeynta dembiyada, hababka loo maro sugiddooda, ciqaabaha iyo go'aannada la xiriira fulintooda.

Qaanuunka maaliyaddu wuxuu xiriir joogto ah la leeyahay qaanuunka idaariga ama maamulka, weligiina asaga ayuu ka mid ahaay, hase ahaatee, ahmiyadda gaarka ee uu yeeshay waqtiyaalkaan dambe awgeed, ayuu uga soo go'ay kan kale, si uu keligiis isu taago, una nidaamiyo mowduuca ahaan, waxaa soo gala qaranka iyo wixii ka baxa, ama si kale haddii loo yiraahdo, dakhliga qaranka iyo kharajkiisa. In kasta oo soohinta u dhexeysa qaanuunka maaliyadda iyo kan dastuuriga aysan uga muuqato tan u dhexeysa qaanuunka ciqaabta iyo midka dastuurigan haddana dabeeecadda dhaqaale ee mowduuca

qaanuunka maaliyadda iyo midda siyaasadeed ee qaanuunka dastuuriga waxay aad u sii caddeynaayaan soohintaas labadaan qaanuun u dhexeysa.

Dhibaatada weynu waxay ka imaaneysa kala soocidda qaanuunka dastuuriga iyo kan idaariga ah.

Sababta keeneysa dhibaataan waxaa ka mid ah mowduucyada labada qaanuun isugu imaanaayaan iyo isdhenggalkooda xad dhaafka ah, haddii loo fiiryo qawaaniinta kala ee la wadaagta magaca guudnimo, hase ahaatee, labada qaanuun waxay leeyihin waxyaabo laga kala sooci karo, kuwaas waxaa ka mid ah in hawlaha qaanuunka dastuuriga tan ugu muhimsani tahay abuuridda hay'adda qaanuun dejinta xaddidida awoodaheeda iyo xiriirka ay la leedahay kuwa kale ee fulinta iyo garsoorka, marka hawlaha qaanuunka idaarigahu ku kooban yihiin nidaaminta, saldada dawladda oo idaariga ah; guud ahaan, gaar ahaanna, hawlaheeda maamuleed (actes administratives) oon lahayn ama ka maqan tahay dabeeecadda siyaasadeed waxaa ka mid ah kuwa nidaaminaaya xiriirka saldada fulinta ahu la leedahay midda Qaanuun Dejinta (sida fadhi isugu yeeridda barlaamaanka, dib u dhigidiisa iyo kala diridiisa, sida dastuurkeenni hore ugu tilmaamaayey qodobaddiisii 53;54, dastuurka cusubna, koolkiisa ugu tilmaamayo qodobadiisa 63,64,) hawlaha saldada fulintu ugu matilayso qaranka xiriirkiisa dibedda (sida ku baqidda dagaalka ama nabadda, meelmarinta heshisyada dawliga ah oo ku xusan qodobka

82aad ee dastuurka cusub) iyo kuwa ay ku bedbaadinayso gobanimadiisa ee isla dastuurka ku tilmaamayo qdobkiisa 83aad sida ku baaqidda xaala-daha aan caadiga ahayn ee dalka iyo soo saaridda qawaa-niin la xariirka duruuftaan iyo wixii la mid ah).

Haddii la doonaayo caddeyn dheeraad ah, inkasta oon hal-kaan dhammaan lagu soo koo-bi karin, waxaa la raaci kara intaas, laba xaaladood ama arrimo oo ahmiyad u leh. Intey la ekaataba kala soocidda haw-laha maamulka iyo kuwa xukuumadda ama dawlada ee da-beecadoodu kala gedisan tahay. (Labada eray xukuumada iyo dawlada waa isku mac-no haddii la raaco dastuurka cusub). Xaaladda hore waxay tahay in hawlahaa xukuumadu ama dawladdu, tii la yi-raahdaba, gelaayaan xerada ama xuduudka qaunuunka

dastuuriga, marka hawlahaa idaarigaahu yihii nuxurka qaunuunka maamulka ahu ku shuqlan yahay.

Midda labaad waxay tahay in Barlamaanku (ama Golaha Shacbiga) ku leeyahay hawla-ha dawladda oo daabeecadda Gaarka leh awood kormeer ama baaris, sida dastuurka cu-sub ugu tilmaamay qdobkiisa 75aad, marka garsoorku ku leeyahay hawlahaa maamuleed awood kormeer oo ugu duwan dabeecadeeda garsoornimo taas siyaasadeed.

Waxyaabaha kala soocaaya ama kala saaraaya laba qaa-nuun kuma koobna keliya mawduucyada kala gedisan ee midkiiba qaarkliisa u nidaami-naayo.

Waxaa kale oo jira habab lagu kala xaqijiyo ujeedooyinka kala jaadka ee labada qaa-

nuun, sidaasna ku noqon kara astaamo lagu kala sooco, ku-waas oo ah dariiqadaha ama siyaabaha kala duwan ee mid-kiiba ku xalliyo arrimiiisa ama uu ku gaaro ujeedadiisa gaar ahaaneed.

Mitaal ahaan, si dastuurku u gaaro ujeedadilisa, wuxuu qaunuunka guud ee qaranka u dejinaya mabda'a guud ee asaasi ah, marka qaunuunka maamulkaanu xaddidaayo, si uu u fuliyo mabda'iidaas, shuruudaha lagu hirgelin karo ama lagu xaqijin karo.

Soo gabagabayntii, xiriirka labadaan qaunuun wuxuu isugu soo biyo shubanaayaa, nu-xur ahaan, in qaunuunka das-tuuriga ahu yahay qaunuunka maamulka gogoldhig ama bilaaw lagama maarmaan ah, si-da kan dambe kolkiisa ugu ya-hay, kan hore dhammaystir, asagu sidaas oo kale, lagama maarmaan ah.

WAXAA LAGU DAABACAY
WAKAALADDA MADBACADDA
QARANKA
MUQDISHO

## NOLOSHA XISBIGA



# Abaal-marinta 10 kii Sanno ee Kacaanka



Xoghayaha Guud ee XH-KS, Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu 28dii bishii Maarsso ugu baaqay dhammaan ummadda Soomaaliyeed inay sii wadaan halgankii dheeraa ee soo taxnaa 10kii sano ee Kacaanku jirey, kaasoo noqday mid dhidibbada loogu aasay qarannimada iyo sharafta Ummadda Soomaaliyeed.

Jaalle Siyaad oo ka had-

laayey munaasabadda abbalmarinta tobant-guurada Kacaanka 21ka Oktoobar ee lagu qabtay garoonka ciyaaraha ee istaadiyo Muqdisho, wuxuu caddeeyeyin loo baahan yahay in la laba-laabo tallaabooyinka lagu horumarinaayo dal ka, iyadoo la midaynayo muruqa, maskaxda, iyo maalkaba, hal hayskuna noqonaayo hadal yar, hawl badan iyo hanuunsanaan iyo

isku fillaasho Soomaaliyeed xag dhaqaale, bulsho iyo mid siyaasadeedba.

Madaxweynaha oo la hadlaayey dad tiradoodu sare u dhaaftay 35.000, oo ka soo qayb galay munaasibaddaasi abaalmarinta ah, waxa uu sheegay in dadka halganka adag u soo galay dhismaha kacaanka ee 10kii sano ay tiro iyo baaxadba ka badan yihiin kumanyaalka qof ee sida firfircoonda ah uga qayb qaatay dhismaha dalka iyo difaaca Qaranka.

Wuxuu kaloo intaa raaciyeey in inkastoo wada jirka shacbiga Soomaaliyeed lagu hantiyey guulaha uu dalku gaaray, haddana ay xaqiq tahay inay dadka iyo hay-aduhuba ku kala heer sareeyaan halgankaas, sidaa awgeedna ay lagama-maarmaan tahay in qof kasta iyo hay'ad kasta lagu abaalmaryo kaalinta uu ka soo qaatay halgankii bulshada ee 10kii sano.

Xoghayaha Guud wuxuu caddeeyey in uusan weli dhammaan halgankii dhismaha dalka iyo abaalmarinta Kacaanka, sidaa awgeedna loo baahan yahay in halganka halkiisii laga sii wado, iyadoo qof waliba lagu abaalmarin doono wuxuu mutaysto.

Mar uu ka hadlaayey arrinta qaxootiga Jaalle Siyaad wuxuu sheegay inay Soomaaliya haatan joogaan



kumaan - kun qof oo qaxooti ah oo ka soo qaxay dilka iyo cadaadiska xabashida wuxuuna sheegay in loo baahan yahay sidii caadada noo ahayd in dadkaasi qaxootiga ah la geesinnimo ge liyo, gacanna lagu siiyo badbaadada noloshooda.

Madaxweynuhu wuxuu tilmaamay in isticmaarku ku andaconayo in JDS ciddammadeedu ay dagaal kula jiraan xabashida, taas oo ah been ay isticmaarka iyo dabadhiliyadiisa ay wareejiyeen oo aan sal iyo raadlahayn.

Wuxuu intaa raaciyeey Madaxweynuhu inay tahay caadada gumeysiga in markii uu u adkaysan waayo dagaalka gobonnimadoonka ay u geddiyaan arrin laba dawladood oo ay dabka gu dahooda ka baxaya kula galgashaan dalalka la jaarka ah.

«Annagu haddaan nahay JDS, dagaal askareed kulumma jirno xabashida, waxaa la dagaallamayaana waa go-

bonimadoonka u halgamaya xornimadooda iyo aaya - katlintooda», ayuu yiri Madaxweynuhu.

Jaalle Siyaad wuxuu garoonka Istaadiyo Muqdisho ku guddoonsiiyey Hay'adihi iyo dadkii mutaystay abaalmarintii Toban - guuradii Kacaanka 21ka Oktober.

Abaal - marintaasi oo isugu jirtey billado iyo shahaado sharafyo waxaa ku kala

guulaystay 141 hay'adood iyo dad tiradoodu gaarayso 7799 qof.

Waxa kale iyagana mu naasabaddaasi abaalmarintii difaaca Kacaanka lagu guddoonsiiyey 5570 qof.

Abaal - marintu waxay u qaybsanayd billado dahab ah 3, bilado qalin ah 229, bilado Maar ah 2006, Shahaa do sharafta 1aad 1435, tan 2aad 1836, tan 3aad 2292.


Dhinaca difaaca Kacaanka waxay iyaguna ahaa yeen, billad qalin ah 1, bilado Maar ah 119, Shahaa do sharafta 1aad, 2aad iyo 3aad oo tira guud dhan 5450.

Billadaha dahabka ah hay'adihi iyo dadkii mutaystay waxaa ka mid ah:  
— Wasaaradda Gaashaan dhigga,

— Wasaaradda Waxbara shada iyo Barbaarinta iyo Jaalle Cabdirisaq Maxamuud Abubakar.



## ARRIMAHADUNIDA



### El Salfadoor.

19 Juulay 1979 ayaa Jab-hadda Sandanista ka fara maroojisay xukunkii dalka Nicaragua keligi tashadihii SOMOZA.

Ayaantaa ka dib waayo cusub ayaa Nicaragua ka sokow, ameerikada dhaxe u bilowday. Waxaa aad u xoogaystay dhaqdhaqaaqyadii shucuubaasi kaga soo horjeedeen talisyada ka dhisan, gaar ahaan waxaa ugu kulul dalka EL SALVADOR oo wakhtiyadan dambe ay ka taagan tahay xiisadi.

Si aysan EL SALVADOR u marin jidkii Nicaragua, ayaa 15 Oktobar 1979 waxaa dalkaa ka dhacay af-gambi ciidammo oo ay ka dambaysay Dowladda Maryankaku.

Durba waxay ballan - qaa-

dday xorriyadda muwaadi-niinta iyo isbeddelka dhaqaale, khaasan kuwa ku saabsan qaybsashada dhulka.

Dhulka intiisa badan waxaa iska leh dhowr iyo toban qoys.

Inkastoo ay ballanqaadyadaas taageereen Axsaabta ay ka mid yihiin: Xisbiga shuuciga, Social Demografiya iyo Demokirastiyaanka; ilaa hadda wax tallaabo demqaraaddiyayn ah oo fushay ma jirto.

Taasi waxay keentay inay Axsaabtii intooda badii kala noqdaan taageerid-dii ay dowladda u ballantjaadeen, waxayna hadda dowladdu ku tirsan tahay Xisbiga Demokristaanka oo keliya.


Waayadan dambe waxaa aad u xoogsaday qaskii iyo iska horimaadkii hubaysnaa oo ka socday dalka, khaasan caasimadda Son-Solvador oo usbuuc kasta ay ku dhintaan dad fara badani.

Dilkii ugu foolxuma badnaa wuxuu ahaa kii uu ku geeriyyooday baadariga Oscar Romero.

Oscor Romero wuxuu caan ku ahaa u dagaallanka xuquuqda bani-aadamka iyo xorriyadda.

Dilka Oscar Romero wuxuu tusaale u yahay in dow ladda El Salvador ay ka no qotay ballanqaadyadii, ayna doonayso inay dalka xoog ku xasiliso ayadoo isku hallaynaysa taageeridda ay dhowaan ugu baaqday dow ladda Mareykanku.

## WARBIXINTA BISHA

**Xuska Maalinta Xoogga Dalka.**

Madaxweynaha JDS J/Le Maxamed Siyaad Barre waa 12kii Abriil lagu guddoonsiiyey Billad geesiga Soomaaliyeed xaflad loo sameeyey 20tan guuraddii ciidanka xoogga Dalka Soomaaliyeed, oo ku beegan 12ka Abriil laguna qabtay rugta Saraakiisha ee Magaalada Muqdisho.

J/le Maxamed Siyaad Barre Madaxweynaha JDS wuxuu billadaasi ku muteystay isagoo ka mid ahaa asaasayaashii ay taariikhdu xusayso kaalinta ay ka soo qaateen asaaska abaabulka iyo carbinta xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Xoghayaha Guud ee XH-KS wuxuu kaloo ku mutaystay Biladaasi gacantii weyneyd ee uu ka geystay guulihii dhaxal galka ahaa ee

xoogga dalka Soomaaliyeed ka soo hooyeen halgankoodii taxanaha ahaa ee labaantakii sanno ee aynu soo dhaafnay ee la xidhiidhey xagga difaaca nabadgelyada iyo horumarka dalka.

Isla munaasabadaasi wuxuu J/le Siyaad Billad da-

hab ah ku guddoonsiiyey Madaxweyne ku xigeenka kowaad J/le Maxamed Cali Samater oo ku muteystay qaybtii wacneyd ee uu ka soo qaatay halgankii taxanaha ahaa ee dhismaha xogga dalka iyo horumarka dalka.

J/le Siyaad wuxuu iyagna billado isugu jira dahab. Qalin iyo maar ku guddoonsiiyey Jaallayaal ka tirsan Clidamada Qalabka Sida ee Dalka JDS oo si daacadnimmo ah uga soo baxay waajibaadkii ka saarnaa qaranka Soomaaliyeed.

Madaxweynaha JDS J/Le Maxamed Siyaad Barre oo Munaasabadaasi khudbad ka jeediye wuxuu ugu horeyntii amaan iyo bogaadin u jeediye dadkii soo qaban-qabiye xafladaasi iyo Jaalleyaashii muteystay abamarintaa, iyo dhamaan xoggaa Dalka Soomaaliyeed.



Ka hor Madaxweyne ku-xigeenka Kowaad, ahna Wasiirka Gaashaandhigga J/Le Maxamed Cali Samater, wuu salaan iyo hambalyo u diray dhamaan saraakiisha, saraakiil xigeennada, laylis sarkaal, alifleyda iyo dableyda xoogga Dalka Soomaaliyeed isagoo ugu hambalyeynaya labaatan guurada.

J/Le Samater oo xafiiskii-

sa ugu warramay weriyeyaaal ka tirsan Wasaaradda Warfaafinta waxaa uu tafaasiil dheer ka bixiyey dhismaha, tababarada iyo abaabulka xoogga Dalka Soomaaliyeed, wuxuuna sheegay in xooggaa dalku waajibaadkiisa kowaad uu yahay inuu kafalla qaado daafaca dalka iyo sugiidda nabadgelyada guudha iyo dibedda.

Wasiirku wuxuu intaa raaciyeey in xoogga dalka tan iyo intii dhidibbada loo aasay aad loogu dadaalay sare u qaadidda aqoontooda guud iyo tan xirfadeedba. iyadoo tiro iyo tayaba ay maanta ku filan yihiin daafaca dalka iyo xaqijinta qarannimada Ummadda.

## Shirkii Dib u habeynta Xeerka Ururka M. Afrika.



Wasiirka Wasaaradda Arri-maha Dibadda ee J. D. S. Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre oo mu-naasabadda furitaanka shirka dib u habaynta Xeerka Ururka Midowga Afrika ee 7dii April ka furmay muqdiso, hadal dheer ka jeediyey wuxuu ka warramay baahida weyn ee Afrika ay u qabto dib u habeynta xeerka UMA, (OAU) taasoo uu sheegey in xeerku uu soo dhisnaa muddo fara badan lagama - maarmaana ay no-qotay in dib loo eego iyadoo Afrika ay la soo gudboonaatey duruufo gaar ah ee la xidhiidha dhinacyada dhaqaalaha, siyaasadda iyo arri-maha ijtimaaciga.

Shirkii wuxuu u doortay guddoomiye, ergada Soomaalia, safiirka Soomaaliya ee Geneva J/Le Cabdillahi Siciid Cismaan, iyo ergada Siora Leone, Morocco iyo Malawi oo loo doortay guddoomiye ku-xigeenno.

Waxaa kasoo qayb galay shirka 14 dal oo ay ka mid yihiin; Somalia, Morocco, Mali, Malawi, Cameroon Bu-ruudi, Swaziland, Kenya Congo, Uganda, Benin Sierra Leone Masar iyo Liberia.

Wasiirku wuxuu caddeeyey in dib u habeynta Xeerka Ururka Midowga Afrika ay Madaxda Afrika dhowr jeer isku soo qaadeen

sidi wax looga qaban la-haa, hase yeeshi sannadkii ina dhaafey ee 1979kii lagu gudoosaday shirkii lagu qab-tay magaal Madaxda Dalka Liberia ee Monrovia in la dhiso gudiyaal hawshaasi loo xilsaaro oo fuliya.

Isagoo hadalkiisii sii wata wuxuu yidhi «waxaa bogaad-in mudan in la dhaqan ge-liiyey haatan hindisahaas si-da ku tilmaaman go'aankii shir-madaxeedka OAU. Sugida ujeeddada gud-diga waxay gaar ahaan koobaysa saameynta hindisayaal loo gudbinayo binayo madaxda dalalka Afrika si aragti ahaan loo-gaga shidaal qaato dib u habeynta Xeerka Ururka iyadoo la cuskanaayo wixii waayo aragnimo ah ee la gaadhey si loo sii xoojiyo wada-shaqeynta iyo wax ku-ool nimada hay'adaha Ururka.


Mar uu ka hadlaayey hawsha shirkani, wasiirku wuxuu sheegay in guddigani dib u habeynta xeerka ee UMA uu ka dambeeyey hindiseyaal dhowr ah oo ay ho-rey u soo jeediyeen Madaxweynyeasha Afrika oo u ka mid yahay Madaxweynaha JDS J/Le Maxamed Siyaad Barre.

Wuxuuna wasiirku shirka

xusuusiyey khudbadii Ma-daxweynaha JDS uu ka jee-diyey shirkii Madaxweyne-yaasha UMA ay ku yeeshen Magaalada Kampala 1975kii markaasoo J/Le Siyaad ahaa Guddoomiyaha Urur-ka Midowga Afrika oo uu uga baaqay Afrika inay la-gama maarmaan tahay in dib loo habeeyo xeerka Ururka iyo qaabka dhismi-hiisa si loo kordhiyo kartida ururka, isla markaasna loo adkeeyo halganka dheer ee loogu jiro, xornimada, mid-nimada iyo horumarka Afri-ka.

Wasiirka Arrimaha Di-bedda ee JDS J/Le Cabdi-raxmaan Jaamac Barre wuu ugu baaqay dawladaha Afrika inay meel qura uga soo wada jeestaan xaqiijin-ta himilooyinka wax wada qabsiga dhaqaale, siyaas-deed iyo bulsho, mid gobo-leed iyo mid qaaradeedba, si loo sii xoojiyo midnimada dawladaha Afrika.

Munaasabada furitaanka shirkii ugu horeeyey ee dib u habeynta xeerka UMA, wuxuu sheegay inay lagama maarmaan tahay in cu-leys weyn la saaro dib u habeynta xeerka ururka dhinaca iskaashiga dhaqaa-le, saldhig adagna looga dhi-go wax wada qabsiga xagga



dhaqaalaha dalalka Afrika.

«Ururka Midowga Afrika oo maanta 17 jirsaday, Ma-daxbanaanidiisii siyaasa-deedna xidideysatay lagana adkaaday gumeysiga iyo midabtakoorka, waxaa loo baah-an yahay in meel qudha looga wada jeesto himilo-yinka dhaqaale ee Afrika, mid qaaradeed iyo mid go-boleed intaba» ayuu yidhi Wasiirku.

Isagoo hadalkiisii sii wa-da wasiirku wuxuu cadeeyey inaysan qilmo waxtar, ah yeelan karin midnimada Afrika xag dhaqaale iyo si-yaasadeedba haddii ayan xil weyn iska saarin arrinta muhiimka ah ee la xiriirta

xuquuqda aadamiqa, wu-xuuna intaa raaciye in xad-gudubka joogtada ah ee xu-quuqda aadamiqa, iyo xur-riyadda ay sal u yihiin dhi-baatooyinka ku yimaada dadyowga Afrika, kuwaasoo dhaliyey in dad ka badan 4 milliyam oo qaxooti ah ay maanta Afrika joogaan ku-waasoo ka soo cararay gu-meysiga iyo cadaadiska dal-kooda.

Si looga hortago dadka badan ee Afrikaanka ah ee la xasuunqayo, la cadaadinaa-yo waxaa loo baahan yahay buu yidhi wasiirku, in Afrika ay talaabo mideysan ka qaado xoog weyn la saaro mabda' ah aaya ka talinta».

## HIDDAHA IYO DHAQANKA



### Suugaanka Kacaanka

— Axmed C. Xange

Horukaca aqoonta sare ee mar kasta ku xiran yahay bulshada, Sida xeerka, durraamadka, suugaanta, kd. Wuxuu awoodda dhaqaale ee dal kasta leeyahay, maxaa wacay a-qoomahaas bulshada waxaa loo yaqaan in ay ku dul dhisan yihiin rukunka dhaqaale ee jira, Heer sare ee dhaqaale wuxuu dhaliyaa horukaca dhaqan ee dadku u aayo; sida buugag, wargeysyo, goleyaal maawelo, shineemooyin, kd. Oo kordha, ka dibna garaadka dadweynuhu isna kordho. Dalalkii la guomeysan jirey, sida Soomaaliya, madax - bannaanaanta siyassadeed waxay ahayd, welina tahay, gundhingga horukaca guud ee bulsada; maxaa wacay qofku kama tashan karo aayihisa haddii uusan xor ahayn.

Hubka qofku ugu diriri jirey gobannimadiisa waxaa ugu weynaa seefta iyo qalinka, kan dambe baana marar badan ka xoog weynaa kan hore. Bulshada Soomaaliyeed haddii la eego waxaa jirey gabay - yahanno daljecleyaal ah oo hub dagaal - ahaan ugu adeegtey suugaanta dadweynaha waagii lagu jirey halganka gobannimo - doonka qaranka Soomaaliyeed. Kol hore waxaanu tusnay (eeg Heegankii 4/5/79) sidii geesigii qaranka Soomaaliyeed, Sayid Maxamed, maansadiisa uga dhigtay hub leh awood weyn ee uu kula diriro gumeysteyaalkii Reer - Yurub iyo soomaalidii la safatay iyaga. Soomaalidu ma lahayn af

qoran waagii Sayidku dagaalla-diisii ku qarxiyey gumeyste-yaalkii soo weeraray dalkiisa; sidaas awgeed suugaanta dadweynuhu waxay Sayidka u noqotay awoodda war - isgaarsiinta iyo kicinta ciidammada gobannimodoonka, si ay ugu darbadaan halganka kulul. Ilaa waagaas suugaanta soomaaliyeed waxay noqotay hub xoog weyn oo loogu diriro gobannimodoonka soomaaliyeed ee Sayidkii shiday ololkeeda.

Noocyada maansada ee ku habboon baraaruujinta dadweynaha, Sayidkiina ku dhaqmi jirey waagii uu Wadey dagaalla-diisii, waxaa ka mid ah gabaya, geeraarka, masafada, wilgada, kd. Noocyadaas maansadu, oo aannu kol hore kaga faalloonnay isla Heegankii 4/5/79, waxay weligood caan ku ahaayeen reer - guuraaga ku nool gobollada woqooyi - bari ee Soomaaliya, halkaas oo dagaalladii Sayidka badidood ka socdeen. Waxaa kale oo jira in noocyadaas maansadu boqol guurooyin ka hor ku hir gaaleen farshaxanka suugaanta soomaaliyeed; kaas oo, malaha, la bilowday Raage, oo loo aqoonsaday aabbehii maansada qadiinka ah ee soomaaliyeed.

Xilligii gumeysiga ee Soomaaliidu soo martay boqol sa-no ku dhowaad, horukaca nolosha dhaqanka soomaaliyeed waa la xayiray. Guul darraadas ku dhacday taariikhda soomaaliyeed awgeed indheer.

garadka iyo atqoon - yahanka soomaaliyeed ma helin awood-dii garaadkoodu ku kori lahaa, saa waa la is - hor taageye. Kartidooda abuureed halkaas bay ku hagaastay, curdankii bayna ku ingegtay arrintaas, waxey waligeed aheyd g undhigga Siyaa sadda Reer - Yurub, taas oo taawinaya-sa baabi'inta qiimaha dhaqan iyo kasmada abuureed ee dadka la gumeysto; iyo weliba in dalalkaas lagu tallaalo waxa lagu sheego hab - nololeedka reer - galbeed, taas oo, sida runta ah, aan wax kale ahayn, faanka iyo islaweynida gumeysteyaalka mooyiye.

In kastaba, cadaadinta guomeysigu ma awoodi karto in ay joojiso himilada dad idil oo kacaamay; calankii gobannimada soomaaliyeed ee Sayidkii dhidbayna mar labaad bay dad'dii dambe ka jafeen habaaskii oo sanooyinkii afarta-naad ee qaran kan ka dul babbiyen ciidda carfoon ee soomaaliyeed. Gabay - yahanno caan ah baa ka qaataay qayb wacan halgankii adkaa ee xoraynta dalka hooyo, iyaga oo horseed iyo afhayeen u ah dadkooda. Sidii waagii Sayidka oo kale, ma jirin qalab war - isgaarsiineed, sida wargeysyo, radio, kd. ee taliskii gumeysi-ee Soomaaliya ugu talagay wargelinta dadweynaha oo badidood aan aqoon akhrin iyo qorid. Gabay - yahanka iyo waayo - araggooda oo keli ah buu dadweynuhu u doonan jirey waano iyo wadid waaya-

haas kharaaraa ee sheekada soomaaliyeed soo martay. Mar-kaas oo kale ee nolosha bulsha-du murugsan tahay dadweynu-hu wuxuu iska soo dhex saa-raa geesiyadooda qaranka. Waagaasi wuxuu ahaa, sanoo-yinkii afartanaad iyo konto-naad, xilligii maansayahanna-da - daljecleyaalka soomaali-yeed oo noqday garwadeenkii dadkooda, dalka oo idilina wu-xuu ku garab taagnaa qeylo-dhaantooda hub - qaadidda ahayd.

Maansooyinkii la curiyey waagaas ee ololiyey wadnaha soomaaliyeed meel kasta ha joogeene waxaa ka mid ah heestii la magac baxday SOO-MAALIYEY TOOSA; « ee loogu wal - qalay gobannimada iyo wadajirka Soomaaliyeed. Taasi waxay ahayd qaylodha-an loogu baaqayey soomaali oo idil meel ay joogaanba, si ay u

qaataan hubka oo ugu diriraan xornimada dalkooda hooyo. Heestaas gashay waayaha dal-ka, ee uu curiyey jaalle Cali Mire Cawaale sanadii 1946kii, dadweynaha baa wada bartay, miraheeda iyo luuqdeedba; wa-xaana laga tirin jirey shirarka siyaasadeed ee Ururkii Dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku fi-rirsanaa dalka oo idil. Ujeedda-da heestu waxay ahayd dhiirigelinta iyo kicinta dadweynaha, si ay ugu guntadaan lool-lanka heegan ee loogu jirey madaxbannaanaanta dalka hooyo. Wax ay gumeysteyaalku ka nebcaayeen heestaas ma jirin, say iyaga bay dab ku oo-geyseyey, si looga eryo ciidda carfoon ee soomaaliyeed.

Waayihii Sayidka dagaalla-diisu socdeen (1901 - 1920) ee uu la loollamayey gumeystey-aalka Reer - Yurub iyo Am-

xaarada, daraawiishtu waxay lahaayeen erayo ay isugu baa-qaan, sida «daraawiish», «wee-rar» «Sayid», kd. Erayadaas bay ku dagaal gelii jireen da-raawiishtu, argagax iyo dhaka-faar bayna ku abuuri jireen ca-dowga shisheeyey; soomaalida-se yididdilo iyo geesinnimo bay gelin jireen. Sidaas oo ka-le jaalle Cali heestiisu waxay taabatay wadnaha dadkiisa, waxayna noqotay amaanta go-bannimada soomaaliyeed. Hanashadii xornimada qaranka ka dib heestaasi marna ma qime jabin, guubaabadeediina ma gabobin oo welii sidii baa looga tiriya shirarka bulshada ee tu lug leh baraarujinta dadweynaha, radiyaha qaran-ka waa laga baahiyaa. Sanoo-yinkli tegey «SOOMAALIYEY TOOSA» waxay runtii, noqotay ammaanta calanka Soo-maaliya, in kasto oo aan welii si joogto ah loogu aqoonsan. Jagadaas muunada sare leh bay heestu haatan kaga jirtaa suugaanta kacaanka soomaali-yeed. Miraha heesta da'dii ho-re way wada yiqlinneen, gur-boodka haatan kacayase in ayan aqoon baa suurowda:

Soomaaliyey toosoo  
toosoo isku tiirsada ey  
hadba kiina taag daraney  
taageera weligiin ey;  
waxa aan la taahaayoo  
ilmadu iiga qurbanaysoo  
ikhtiyaar nin loo diidoo  
la addoonsadaan ahay ey;  
Soomaaliyey toosoo  
tulud geelee oo dhacan baad  
toogasho u bareedhaan ey  
ma dhulkaan dhan oo tegey  
baan  
nina dhagax u tuurayn ey;  
Soomaaliyey toosoo  
tira ariya oo dhaxalaa  
sideed baa naloo tubanoo  
ninba tobani la meel mari-noo  
cadawgeen inoo talin ey  
Soomaaliyey toosoo  
toosoo isku tiirsada ey  
habda kiina taag daran ey  
taageera weligiin ey



Labaatankii sannadood ee kontonaad iyo lixdanaadkii ee qarnigan waxaa lagu qiyaasi karaa xilligii labaad ee dhibibkaca ama soo noolaadka maansada halganka ee Soomaaliyeed; dhibibkacaas oo la bilowday, sidii aannu ku sheegnay qayb I. ee qodobkan, halgankii gobannimo-doonka ee Sayid Maxamed Wadey caaradkii qarnigaan 20aad. Sayidka iyo rag ku la jirey halgankaas oo gacantisa midig ah, sida Ismaaciil Mire, baa waagaas curiyey maansada halganka ee Soomaaliyeed, oo ay hub ahaan ugula dagaallameen gumeyste-yaalka shisheeye iyo dibusocodyadii Soomaaliyeed ee la safty cadowgaii Waqtigaas labaad ee laga hadlayo goobta maansada Soomaaliyeed waxaa haystay maansa-yahanno daljeclayaal ah, oo sii wadi jirey xeerkii maansada halganka ee laga dhaxlay da'dii hore ee maanso-yahannadii Soomaaliyeed. Xilligaa-si, sida dhabta ah, wuxuu ah, mid qallafsan haddii la eego waayihii ama taariikh-dii dhoweyd ee Soomaaliyeed; halgankii gobannimo-doonkuna heer sare buu joogey, Soomaaliduna waxay gaareen wadajir ayan yeelan waagaas ka hor, si ay ugu guntadaan xoraynta ciidda hooyo. Sidii lagu helay wadajirkaas waa arrin yaab leh oo dadkii goobjoogga ah, ee ka qayb galay halganka ay ku adag tahay sheekadeedu, haddii la garwaaqsado in dhibaatooyin badani dhex yiilleen bulshada Soomaaliyeed. In kastaba, waxaa inoo cad in codka maansa-yahanka, daljeclaha Soomaaliyeed door weyn welligiis ka qaadan jirey bararujinta iyo guubaabinta dadkiisa, si ay u gutaan waajibkooda ah gaashaandhigga ciidda hooyo. Arrimaha ay ka mid yihiin wadadhalasha-da, iyo isku dhaqan-ahaanta,

ayaa suuro gelisay wadajirka Soomaaliyeed oo la'aantiis halganka gobannimo-doonku noqon lahaa hal bacaad lagu lisay.

**Caadooyinka** maansada Soomaaliyeed, tii hore iyo tan cusubba, waxaa lagu yaqaan in gabayaagu maldaho ama daboolo shayga ama ujeeddadiisa. wuxuu gabayaagu tilmaamaa shay qimo iyo muuno weyn u leh bulshada uu ku dhex noolyahay.

Tusaale-ahaan, geelu waa laf-dhabarka dhaqaalaha reer miyiga Soomaaliyeed.

**Arrintaas** baa u sabab ah in maansada soomaaliyeed lagu ammaano geela, waxtarkiisa na lagu tilmaamo. Maansoo-yinka ay tiriyeen maansa yahannada caanka ah ujeeddadood, sida badan, waxay ku saabsan tahay arrimo cul culus, sida gobannimo, deeq-sinnimo, geesinnimo rageed, Waxaa kale oo ujeeddada maansadu noqon kartaa kalgacalo iyo ammaan dumar, ama faras dheereeya oo la je cel yahay. Ujeeddada gabayaagu, in kastaba, way u muuqataa qofka Soomaaliyeed ee maqla ama akhrista maansadiisa; maxaa wacay waxaa lala socon karaa firada dahsoon ee maansa - yahanka iyo erayada uu wax ku tilmaamayo, Laakiinse dhib weyn bay ku tahay qofka aan Soomaali u dhalan ee isku daya in uu garto xeerkaas u gaarka ah maansada Soomaaliyeed iyo garaadka hoose ee gabayaaga u gaarka ah maansada Soomaaliyeed iyo garaadka hoose ee gabayaaga curinya maansadaas.

**Sannooy'nkii afartanaad** ka caaradkoodii, kolkii halganka gobannimadoonku gaarey heer sare, talisyadii gumeysi-

ga ee joogey Soomaaliya cadaadin culus bay saareen da-gaal-yahannadii iyo suugaanleydii Soomaaliyeed ee gar-hayeenka u ah, loollanka, si ay u curyaamiyaan dhaq-dhaqaqa gobannimodoonka, wadajirka garwadeenkii-sana u kala dhantaalaan. Waagaas buu gabayaaga, daljeclaha caanka ah, jaalle Yuusuf Xaaji Aadan tiryey heesta soo socota, Jaalle Qarshina ku xiray muusikada yaabka leh:

1. hamuun nin qaboo hashiisa irmaan ha maalin la leeyahaan ahay;
2. Nin hawd fadhiyoo harraad dilaayoo biyihii laga heegey baan ahay;
3. nimaan hadalkiisu hana gelinoo harqoodaalkiyo haweenkaba dhaafin-baan ahay;
4. dagaal nimuu haysto meel halisoo huusiiku hangool yahaan ahay.

Beydka 1-d hesha gabayaagu sheegayo waa gobannima-da uu hamuunta u qabo, ee lama hayo geel hadalkiis.

Bishii Juun 1960kii waxaa la dhidbay, markii ugu horreysay waayaha Soomaaliyeed, Calanka Qaranka Soomaaliyeed oo ka kooban xid-dig cad oo shangees ah oo ku taal cir aan caadna lahayn. Xiddigtu, sida la ogyahay waxay tilmaameysaa shanta qay bood ee gumeystayaalku u kala qaybiyeen carrada Soomaaliyeed, qaar Ingiriis u talin jiray, qaar Faransiis, Talyaani ga, Calankii Ingiriiska kala haysan Jireen ayaa maalin-taas laga dul qaaday ciidda carfoon ee Soomaaliyeed, bo-qol sano ku dhowaad ka dib.

Jaalle Xuseen Aw-Faarax iyo Saxardiid Maxamuud, oo ka dib geeriyoodey, baa dha-raartaas si wacan u tilmaa-may raynraynta xad-dhaafka ah ee uu qabey qofka Soomaa-liyeed, meel kasta ha joogee:

Korsiimo helloo  
Kaalintennii gallee  
gaajadii kulul iyo  
kuudukii ka kacnee  
kun-faciis la cadaab  
Kufrigii erinee  
waa kii aynu rabnee  
kifaaxiise gallee (calanka)  
Soomaalaaay kulligiin  
kulmiyaa la sudhee  
kadabaa dhaha ey..-

Heestaasi waxay ka mid ahayd kuwii caanka noqday waagii la helay xornimada dalka, ama la dhashayba; magac iyo muuno weyn bayna u kasabtay fanyahannadii curi-ye. Saxardiid ma saarra if-

ka, xusuustiisu se waxay ku waari doontaa waayaha dalkiisa. Xuseense waa inoo joogaa, aqoonsi iyo heybad weyn buuna ku leeyahay dalkiisa iyo dadkiisa uu hagar la'aanta ugu soo halgamay xornimadiisa. Cliddu ma il-lowdo carruurteeda.


Qiirada daljeclaanta ee ku dheehan heetaas ka sokow, waxaa fanyahanku ku unkay macne cusub oo uu u helay erayga Kulmiye, Calanka Qaranka Soomaaliyeed. Eray-gaasi waa ku jiri jirey Af-Soomaaliga, macnahaas-se ma lahaan jirin. Erayga calan af-carbeedka ayeyna ka soo ergeysannay, maxaa wa-cay curashadii heestaas ka hor ma jirin eray Soomaali-yeed oo geli karay jagadaas. Afkeennu waa hodan, inna-gaase illownay.

Fanyahannada Soomaali-

yeed maansadooda halganka ah kuma koobna dalkooda oo qur ah ee waxay taageerayeen weligood loollanka gobanni-ma-doonka ee ka socda qa-aradda Afrika oo idil. Geeridii geesigii Afrika, Patrice Lumumba, Jaalle Qarshi wuu ka tirihey heestaan gas-hay waayaha suugaanta Soomaaliyeed, fac ka facna jiri doonta:

Lumumba ma noola  
mana dhiman ay  
labada midna haw ma-laynina ey  
muuqiisoo la waayey mo-oyaan ey  
inuu maqan yahay ha moodina ey;  
madax buu oon ahaa  
mudnaan jiray ey  
Miyay kaalintiisii maran tahay ey?  
mar uun baannu aarsan doonaa!

## ARAGTIDA CILMIGA AH



# Nuxurka Aydiyolojiyadda Hanti-wadaagga .

— Cali X. Cabdulle

Aydiyoloji waa hab xiriirsan oo afkaar iyo aragtido ah, waa hab ay dabaqad mucayan ah ku ilaaliso kuna fuliso fikradaheeda. Fikradahaasi waxay tilmaamayaan meesha ay dabaqaddaasi kaga jirto bulshada.

Ideolojiyadu ma ahan wax kaliceed iska baahda ee waxay u baahan tahay dad baahiya iyo qalab lagu baahiyo. Haddaba dabaqad kastaa waxay leedahay dad u baahiya ideolojiyadeeda maadaama uu dabaqadaha ka dhexeyyo iska horimaad cadawtooyo oo ay leeyihin ideolojiyad kala duwan.

Qasab ma ahan in faafiyaha ideolojiyadu uu ka tirsanyahay dabaqadda uu faafinayo ideolojiyadeeda marka laga eego xaaladkiisa shaqo ee dadka kale (Social status): mar hadduba faafinayo ideolojiyad dabaqadeed yuusan ka tirsanaanin dabaqaddas hadduu doono laakiin wuxuu ka mid yahay aqoon yahannada dabaqaddas. V.I. Lenin wuxuu yiri «Aqoon yahannada waxaan magacaan u siiney waa kooxda si buuxda, dhamaystiran oo faahfaahsan u micnaysa una soo baahisa danta iyo horumarka ay dabaqad mucayan ah suubisay ama ay leedahay» (V.I. Lenin coll. Works Vol 7.P. 45). Gabogabo ahaan aydiyoloji waa hab afkaar iyo aragtido ah oo si toos ah ama aan toos ahayn inkicaas ugu samaysa dhinacyad kala duwan ee nolosha bulshada, waa fikradaha inoo muujinaya qaab-

ka ay dabaqaddaasi u goosatay inay ku ilaaliso ama ku bedesho dhismaha bulshada ee waqtigaas jira.

Haddaan dib u jelleecno taariikhda bulshooyinka adduunka una fiirino si maaddinimo ah waxaanu arkaynaa in noloshu tahay mid ku dhisan halgan iyo iska horimaad ka dhexeyya danooyin kala duwan iyo kuwo isku mid ah gudahooda.

Marka laga reebo bulshadii bidaa'iga ahayd iyo bulshada H/Wadaagga ah waxaa seddexdi hab ee kale oo dhaqan dhaqaale ka dhix jiray loolan iyo halgan iska horimaad ee dabaqado danahodu iska soo horjeedaan.

Dabaqadi waa wax taariikhii ah oo muddo dhashay muddona dhammaanaysa, markuu curtay habkii labaad oo dhaqan dhaqaale, habkii is addoonsiga ayey si cad u muuqataay inay bulshadu u qayb sانتاهay dabaqado iska soo horjeeda.

Hantida gaar ahaaneed ayaa keentay sababna u ahayd soo bixitaanka dabaqadaha. Hantidani ma aysan sababin oo keli ah soo bixitaanka dabaqadaha ee waxay kaloo keen-tay in dabaqad kastaa yeelato aydiyolojiyad u gaar ah oo ay ku ilaaliso kuna fuliso dana-heeda. Halkan waxaa si cad ugu muuqata in mar haddii ay jiraan aydiyolojiyado kala duwan ay khasab tahay inuu ji.

ro iska horimaad, isdiidmo iyo loollan aan kala joogsi lahayn oo ka dhexeyya xoogagga ama dabaqadaha kala duwan.

Nuskii dambe ee qarnigii 19aad ayey aydiyolojiyada H/W si cilmi ah ugu soo ban-naan baxday dunida kana soo gudubtay dhalanteenimadii ay ku jirtay waayihii hore. Maalinba maalinta ka dambeeysay aydiyolojiyada H/W wey sii, xoogaysanaysay waxayna ku dhix baahaysay baroolotaariyaadka iyo dadweynaha dulman. Dabaqadda shaqaala-ha oo ah dabaqada si cad ugu habaysan aydiyolojiyada H/W una mintidaysa hirgelinteedda waxay maalin walba maraysay heer.

1917 Waa maalin baroolotaariyaadka xusid gaar ah ka mudan waxay ahayd maalintii ugu horreeysay oo ay diktaatooriyad boroolotaariyaad ah u soo baxday dunida. Waxaa maalintaas loo Yaqaanaa KOMUNIHII BAARIIS. Inkastoo ay diktaatooriyaadii boroolotaariyaadka ay jirtay 72 maalmood oo keliya (18 Maarsilila 28 maajo 1871) haddana waxaa laga helay waayo aragnimo weyn oo ay xoogagga horusocodka ah ee dunidu ay ku dagaal galeen kuna guulays-teen. Halgankii taxanaha ahaa ee ay dabaqadda shaqaala-ha ugu jireen la dagaalanka dhiigmiiradka iyo isku dulnoolaadka qof qofka wuu sii kordhayey maalin walba wixii ka dambeeyey taariikhda aan kor

ku soo xusnay.

Dabaqadda horusocodka ah waxay aydiyolojiyadeedii si baraatiko ahaan ah u guuleysatay una adkaatay kadib kacaankii waynaa ee Oktoobar 1917 oo uu hoggaaminayey V.I. Lenin. Waqtigan wixii ka dambeeyey aydiyolojiyada H/W waxay noqotay mid daagaal ba'an ku haysa aydiyolojiyada H/G waxayna muujisay aydiyolojiyada hore gacan sarraynta ay ka leedahay tan dambe. Kacaankii Oktoobar 1917 wuxuu dhigay asaaskii adduunku u kala qaybsamay laba hab bulshadeed oo iska soo horjeeda, wuxuuna ahaa Kacaankii ay ku guulaysteen shaqaaluhu furayna waa cusub oo noqday waagii dabar goynta H/G iyo dhismaha H/W. Kacaankii H/W ahaa ee 1917 wuxuu rumeeyey faaladii Lenin uu ku yiri ma suuro geli karto in waddamada adduunka oo dhan kacaan H/W ahi ka curto markeliya ee imberayaaliyadda waxaa laga wareemi karaa meesha ay ugu jillicsantahay, halkaas oo noqotay RUUSIYA, isla markaana waxaa ka jiray xaaladahii objektifka iyo sabjetifka ahaa ee uu u baahnaa dhalashada kacaan H/W ah.

Aydiyolojiyada H/W waxaa maanta aaminsan una mitida hirgelinteeda iyo dhismaheeda in ka badan 90 xisbi oo ah axsaabta noocca cusub. Sannadkii 1969, 21 Oktoobar waa dalkeenna ka curtay kacaan H/W ah oo ay hoggaaminayaan saraakiil horusocod ah oo uu hoggaaminayey Jaalle Maxamed Siyaad Barre, kacaankayaga H/W ah oo haatan tobant jirsaday wuxuu guullo waaweyn oo wax ku ool ah oo la taaban karo u soo hooyey ummadda Soomaaliyeed gaar ahaan xoogsatada muruq maalka ah, guulahaasi maahan kuwo lagu soo tirin karo

warqad dusheedna looga bogan karo waxaa inagu filan oo kali ah inaan si kooban u ni-raahno kacaanku wuxuu ku guulaystay hirgelinta iyo dhamaystirka dhammaan qodobadii ku caddaa baaqiisii koo-waad, waxaa u suurto geliyey kacaankayaga inuu hirgeliyo waxaas oo guulo ah waxay tahay ku mintidka hirgelinta iyo dhismaha aydiyolojiyada Maarkiisin - Leninism, Jaalle Siyaad Xogayaha guud ee XHKS Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dumoqraadiga ee Soomaaliya oo ka hadlayey doorashada aynu dooranay aydiyolojiyada H/W wuxuu yiri «Waxaannu Dooranay H/W Cilmiga ku dhisan waayo waa jidka kali ah ee aan ku gaari karno isbedel dhaqsi leh ee dhinacyada kala duwan ee noloshada bulshada.» Kacaanku wuxuu badalay habkii siyaasadda, dhaqaalaha iyo kii bulshada ee dalka Soomaaliya wuxuu noqday kacaan ku abuuraya dadyowga Afrika niyad kacaanimo ah kuna guubaabinay inay ka baxaan dulliga iyo darxumada Imberyaliy Simku ku hayo inay midnima-dada dadyowga Afrikaanka tahay danta keli ah ee Afrika.

Kacaanka Oktoobar ee Soomaaliya wuxuu beeniyey fikradihii danaystayaasha iyo hanti wadaag xumaysasha ku doodi jiray in lasoo maro H/G si H/W loo dhiso, wuxuuna tusaaya in H/W uu dhisi karo dal aan soo marin H/G dhinaca dhaqaalahana ka dambeey, shaqaale badan oo urursanna aan lahayn.

Kacaanka Oktoobar 1969 wuxuu baraatiykada ku xaqiijiyey in cilmiga M/Leninism uusan ahayn cilmi dokomantiga ah balse yahay cilmi barbaaraya oo dal kastaa waayo aragnimadiisa kacaaneed u tahay ballaarin iyo naax naixin. Kacaanku wuxuu u halgamayaa

in Soomaaliya noqoto bulsho H/W ah.

Dunida waxaa ka jira laba aydiyolojiyadood oo kala duwan waxayna kala raacsan yihiin labada hab ee dhaqan dhaqaale ee H/G iyo H/W, mana jirto aydiyolojiyad saddexaad ee dhex mari karta labadan aydiyolojiyadood.

Jaalle V.I. Lenin oo arrintaan ka hadlay wuxuu yiri «ma jirto aydiyolojiyad saddexaad dunida maanta aynu ku noolnahay, qofkii ama kooxdii ku andacootana in aydiyolojiyad saddexaad jirto waxay noqonayaan kuwa gaacn siiya aydiyolojiyada burjuwaasiyadda.» (V.I. Lenin Coll; Works, V5, P 384).

Aydiyolojiyadda H/W waa aydiyolojiyadda leh qawaaniin iyo mabaadii ay ku saxaysow Waxay doonaysaa inay bulshada aadamigu gaarto horumar dhan walba ah. Aydiyolojiyadi waa aydiyolojiyada waa ga kala guurka oo laga guurayo habka H/G ee dulmiga iyo isku dul noolaashada qofka qofka loona guurayo hab cusub ee dhaqan dhaqaale kana sarreeya kan H/G. Waxay dadkeeda bartaa habka lagu gaarayo heerarka horumarka mujtamacu cusub, sidii iyo qaabkii loo baabi'in lahaa dib u dhicii iyo dhaqamadii xumaa oo horay bulshada uga dhex jiray iyo xoogii baabi'in lahaa dib u dhacaas abuuri lahaana bulsho cusub.

Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha Jamhuuriyada Dimoqraadiga ee Soomaaliya Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu isagoo micnaynaya nuxurka aydiyolojiyada H/W yiri, «Aydiyolojiyad H/W waa midda kali ah ee ayuu dhibatada kaga bixi karno, aynuna isku afgaran iskuna raaci karno.»



AWRKU WAA GAADIID HAYIN AH OO KU DHEER DHAQANKA REER GUURAAGA SOOMAALIYEED.



QURUNDA LAPPISKA DHAQANKA BAADIYAHU SOOMAALIYEED







PERIODICAL  
THIS DOES NOT CIRCULATE

